Isbuuclaha BSD - Maajo 3, 2021

Isbuuca Mahadcelinta Macalinka
3-7 Maajo waa Toddobaadka Mahadcelinta Macallinka! Waad mahadsan tihiin, macallimiinta BSD, wixii aad qabateen iyo wixii aad soo qabateenba sannadkan aan caadiga ahayn! # Mahadsanid Macallin

Diiwaangalinta Pre-K Hada Way Furan tahay!
Diiwaangelinta Xannaanada-kahore ee sanad-dugsiyeedka 2021-22 hadda way furan tahay! Daawo fiidiyowgaan waxtarka leh si aad u ogaatid sababta ay muhiim u tahay in goor hore leys diiwaangaliyo iyo sida loo bilaabo hawsha. https://youtu.be/I4aFt7LboA8

Codso inaad u adeegto guddiga miisaaniyadda degmada
BSD waxaa ka bannaan booska Guddiga Miisaaniyadda waxayna raadineysaa musharrixiin kala duwan oo dbuuxiya xilligan, oo dhacaya Juun 30, 2022. Boosku wuxuu ku yaal Guddiga Dugsiga Aagga 4 - Xubinta Guddiga Dugsiga Donna Tyner. Iskuulada Degmooyinka ee matalaya aagan waa Aloha-Huber Park K-8, Beaver Acres, Errol Hassell, Hazeldale, Kinnaman, Mountain View, Aloha iyo International School of Beaverton (ISB). Aagagga Guddida Dugsiyadu gebi ahaanba isma waafaqsana aagagga xaadiritaanka dugsiga, markaa fadlan ka fiiri khariidadaha aagga District website.

Musharixiinta xiiseynaya waa inay ku nool yihiin Aaga Gudiga Dugsiga ee ay matalaan, noqdaan aqoonyahan u qalma degmada, waxay ku noolaayeen degmada hal sano uuna aheyn shaqaale BSD ah. Xubnaha Guddiga Miisaaniyadda waxaa magacaaba Guddiga Dugsiga.

Guddiga Miisaaniyadda waxay dib-u-eegaan miisaaniyadda degmada, waxay soo jeedinayaan isbeddelada loo baahan yahay waxayna oggolaadaan dukumiintiga miisaaniyadda si loogu gudbiyo Guddiga Dugsiga si ay u meelmariyaan bisha Juun. Guddigu wuxuu kulan sameeyaa shirarka fiidkii ee la qabto inta u dhexeysa Nofeembar iyo Juun. Jagadu way furantahay ilaa la buuxiyo kuwa doonaya inay codsadaanna waa inay buuxiyaan application oo ku lifaaq warqad dalabka iyo / ama resume-ga.

Dib-ugu nogoshada Hybrid ee Dugsiga Hoose ee Ridgewood
Dugsiga Hoose ee Ridgewood wuxuu leeyahay tirada ugu sarreeya ee ardayda dugsiga hoose ee ku soo noqda Waxbarista Isku-dhafan ee Shakhsiga ee degmada. Bal u fiirso sida shaqaaluhu si hal abuur leh oo nabadgelyo leh u soo dhoweeyeen ardaydoodii. https://youtu.be/715ZuWU-RXw

Barashada Dareenka Bulshada ee Dugsiga Hoose ee Raleigh Hills

Macallimiinta Raleigh Hills waxay uga hadlaan dhismahooda muhiimadda barashada shucuurta bulshada. Waxay sharxaan shaqada RULER ee ka caawisa ardayda inay muujiyaan sida ay dareemayaan waxayna bartaa istaraatiijiyooyin lagu xakameeyo shucuurtooda waxbarashada ee CDL iyo Hybrid labadaba. https://youtu.be/kWvScE93fdY

Aqoon-isweydaarsiga Ciyaaraha Xannaanada ee Dugsiga Hoose ee Findley

Macallimiinta xanaanada caruurta ee Findley waxay sharxayaan sida ay u isticmaalayeen noocaa loo yaqaan Kinder Play Workshop si ay isugu xirmaan oo ay ula macaamilaan ardaydooda. Macallimiinta xanaanada caruurta ee Findley waxay u adeegsanayeen tusaalahan aqoon isweydaarsiga ah labada nooc ee waxbarid ee Hybrid iyo CDL. Waxaan indha indheyn ku sameyneynaa sida shaqadu u egtahay oo aan kula kulanno qaar ka mid ah xanaanooyinka. https://youtu.be/qMWCSN9EwD8

Diyaargarowga Kulliyadda & Shaqada Taxanaha Xafladaha Khadka ah

Ma jeceshahay inaad wax badan ka barato waxa kuleejooyinka raadinayo codsadayaal? Ma ka walwalsan tahay sida loo bixiyo kulliyadda? Ma hubtid sida loo bilaabo qorshaynta howsha? Dugsiga Degmada Beaverton wuxuu kugu martiqaadayaa inaad kaqeyb gasho xaflado taxanaha ah ee kuliyada iyo u Diyaargarowga Shaqada. Kulan kasta, waxaad ka maqli doontaa qudbooyin ku saabsan kulleejada, aasaaska kaalmada maaliyadeed, sida loo qoro maqaalka kulliyadda iyo dejinta jadwalka senior-ka. Kulamadan waxaa lagula talinayaa qoysaska iyo ardayda ku jirta fasallada 10-12. Booqo College & Career Readiness Virtual Event Series bogga macluumaadka diiwaangelinta. Waxaan sugeynaa inaan ku aragno!

Maalinta Abaalmarinta ee Cuntada Iskuulka

Jimcaha 7-da May waa Maalinta Halyeeyada Cuntada Iskuulka! Waxey u dhaxeeyeen u diyaarinta cunnooyinka caafimaadka leh ee carruurta Beaverton, u hogaansanaanta shuruucda heerarka nafaqada ee adag, ka warheynta ardayda xasaasiyada ku qaba cuntada iyo bixinta adeeg dhoola cadeynaya, shaqaalaha Adeegyada Nafaqada ee BSD waa geesiyaal run ah. Waxaan rabnaa inaan u mahadcelino dhammaan shaqaalaha Adeegyada Nafaqada sida hagar la'aanta ah ee ay ugu hureen si loo hubiyo in canug walba uu helo cunno macaan oo nafaqo leh!

Madasha Musharaxiinta Golaha Dugsiga

Haddii ay dhacdo inaad seegtay, BSD waxay martigelisay Madal Musharrax oo khadka ah https://youtu.be/9LXKgjoH4dw isbuucii hore. 18-ka Maajo, cod-bixiyayaashu waxay dooran doonaan afar xubnood oo ka tirsan Guddiga Iskuulka Beaverton illaa muddo afar sano ah. In kasta oo musharrixiinta laga magacaabayo Aagga Guddiga ee ay ku nool yihiin, dhammaan cod-bixiyeyaasha Degmadu waxay u codeeyaan dhammaan

jagooyinka. Waxaan hadda haysannaa laba musharrax oo u tartamaya mid ka mid ah afarta tartan. May 2021 School Board Election webpage.

Fake & Fatal: Hal kaniini oo Ku Dili Karo

BSD, oo kaashanaysa Booliiska Beaverton, Waaxda Sheriff ee Washington iyo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Washington, ayaa martigalin doonta “Faked & Fatal,” wadahadal bulsho oo ku saabsan halista iibsashada kaniiniyada iyo budada ee baraha bulshada. Isbeddelkan naxdinta leh ayaa galaaftay nolosha in ka badan hal arday oo BSD ee aan shaki laga qabin sanadkii la soo dhaafay. Wadahadalka waxaad ka daawan kartaa YouTube-ka BSD https://youtu.be/vzz8yS4B404. Nolosha ilmahaagu waxay mudan tahay in waqtiga la geliyo.

Maajo Socod +Isgedin Isbuuca Loolanka

Fadlan ku soo biir Wadooyinka Nabdoon ee Beaverton ee Iskuulka munaasabadeena ugu dambeysa ee Walk + Roll ee sanadka! In ka badan 100 abaalmarino ayaa la kala shaandheyn doonaa, isla markaana Wheel Fairy ayaa booqan doonta dugsiyada hoose si ay ugu lifaaqdo abaalmarin dheeraad ah shaagag kasta oo ay ka helayaan qaanadah. Dhammaan ardayda (heer kasta oo fasal ah, iskudhafan iyo CDL) ayaa soo gali karaya baqtiyaanasiibka iyaga oo dhammaystiraya May Challenge form. Waxaa jira shan waxqabad oo laga kala xusho iyo baqtiyaanasiib dheeri ah oo hawl kasta la dhammaystiro. Faahfaahin dheeraad ah ka raadi www.beaverton.k12.or.us/safe-routes

Shaashada COVID-19

Dugsiga Degmada Beaverton ayaa daabacaya data on reported positive or presumed positive COVID-19 cases ee ku jira ardaydeena iyo shaqaalaheena ee bogeena.